KU DHAQAN XAFIIS D.

Faafin Rasmi ah

EE JAMHURIYADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

Sannadka 2aad Muqdisho, Tr. 2 Marso 1974 **L. 3**

Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah
ee ka tirsan Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

FAAFIN BIL SOO BAXA

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Samaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga uu gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janayo. Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinaya Xafiiska Canshuraha ee **Wasaaradda Lacagta**

KOBNIIN

BOGGA KOOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 7 Tr. 26 Dishember 1973 — *Sharci lagu maamuli doono Shaqaalaha Soomaaliyeed ee ka shaqeeya Safaaradaha, Qunsulada guud iyo dadka shaqeeya Safaaradaha oo badbaadada siyaasadda ah leh.* Bog. 124

BOGGA LABAAD

XEER DOWLADEED

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 19 Febrayo 1974, L. 22 — *Dallacaad Sarkaalnimo.* » 126

XEER XOGHAYAHA WASAARADDA LACAGTA, 29 Jennayo 1974, L. 23 — *Qaymi kordhin ku saabsan Toombaakhada beebada «Erinmore Flake» dibedda laga keeno.* » 129

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 21 Agosto 1973, L. 24 — *Siismo dhul Dawladeed la siyey Jaalle Moxamed Axmed Xussen.* » 130

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 16 Dishembre 1973, L. 25 — *Siismo dhul Dawladeed la siyey Jaalle Moxamed Xaji Axmed Wehelie.* » 131

TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS, IYO WAXII LA MID AH

WASARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul *Jaalle Xasna Gaayid Xasan. (48)* Bog. 132
WASARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul *Jaalle Maxamad Sobriye Xasan. (49)* » 132
WASARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul *Industrie Chimiche Somale (Xiirey Qasim Wehliye). (50)* » 133
WASARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul *Jaalle Khadijia Macllim Cusman. (51)* » 133
WASARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul *Jaalle Cabdikarim Xusen Cali. (52)* » 134
WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul *Jaalle Cilm Dalmar Xersi. (53)* » 134
BANKIGA QARANKA SOMALIYED — *Heerka Sarrifka Lacagaha Qalaad. (54)* » 135
BANKIGA QARANKA SOMALIYED — *Heerka Sarrifka Lacagaha Qalaad. (55)* » 136
MAXKAMADDA GOBOLKA MUDUG, Ogeysiis dhumid Jeeg L. 10739 — *Xaji Axmed Biixi Xanaf. (56)* » 137
MAXKAMADDA GOBOLKA XAMAR, Ogeysiis dhumid Jeeg L. 16357 — *Barre Cusman Ciye. (57)* » 138

SHARCI L. 7 Tr. 26 Dishembr 1973.

Sharci lagu maamuli doono Shaqaalaha Soomaaliyeed ee ka shaqeeya Safaaradaha, Qunsulada guud iyo dadka ka shaqeeya Safaaradaha oo badbaadada siyaasadda ah leh.

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka, iyo Sharciga 1aad ee 21kii Oktoobar, 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga shaqaalaha (Labour Code) tiradiisuna tahay 65 ee 18kii Oktoobar, 1972;

ISAGOO ARKAY Go'aanka Golaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayayaasha Dawladda;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Waxaa Wasaaradda Shaqada iyo Ciyaaraha laga furay xafiis la vidhaahdo «Diplomatic Service Bureau» loona xilsaaray daryeelidda sha-

iyo Laamaha Ummadaha Midowbey ee Shisheeyaha u jooga dalka Soomaaliya, iyo hubinta sharciyada saameeya maamulka shaqaalaha ee u degsan dalka J. D. Soomaaliya inay si habsami leh ugu fuliyaan Safaaradaha Shisheeyaha, Qunsulada Guud iyo Laamaha Ummadaha Midowbey.

Qodobka 2aad

Xafiisku wuxuu kala shaqeyn doonaa dhammaan arrimaha ku saabsan xichiidhka shaqada ee u dhexeeya Safaaradaha shaqaalahooda iyo Wasaaradda Shaqada iyo Ciyaaraha.

Qodobka 3aad

Xafiiskaas waxa maamuli doona sarkaal ka tirsan Wasaaradda Shaqada iyo Ciyaaraha, waxaana kaalin doona 3 sarkaal oo ka socda:

b) — Wasaaradda Arrimaha Dibedda;
t) — Taliska Nabad Sugga Soomaaliyeed;
j) — Taliska Booliska.

Qodobka 4aad

1. Dhammaan wixii ku saabsan shaqo siinta, kala qorasho heshiis shaqo, dhexdhexaadinta dacwooyinka iwm.

Safaaradaha iyo Qunsuliyadaha Guud iyo Laamaha Ummadaha Midowbey ee Shisheeyaha u jooga dalka Soomaaliya iyo dadka ka shaqeeya oo badbaado siyaasadeed leh waxay weydiisanayaan Xafiiska «Diplomatic Service Bureau».

2. Haddii ay Safaarad, Qunsuliyad Guud ama dadka ka shaqeeya ee badbaado siyaasadeed leh iyagoo oggolaansho ka haysan Xafiiska «Diplomatic Service Bureau» arrimaha ku tilmaaman xubinta 1aad ee Qoddobkan ku tallaabsadaan waxaa loo qaadan doodan wax-kama-jiraan.

Qodobka 5aad

1. Dhammaan wixii isafgaranwaa ah oo ka dhex dhasha shaqaalaha iyo loo shaqeeyaha waxaa dhexdhexaadin doona Xafiiska «Diplomatic Service Bureau» una kala saxiixi doona aftida dhexdhexaadinta.

2. Xafiisku wuxuu sidaas oo kale saxiixi doonaa heshiisyada

Qodobka 6aad

Qor...a Shaqaalaha Ajinabiga ah

Shaqaalaha Ajinebiga ah oo aan haysan badbaado siyaasadeed lama siin karo rukhsad haddii aysan ka haysan Guddiga Rukhsadda Shaqaalaha shisheeyaha ee Wasaaradda Shaqada iyo Ciyaaraha shaqo nooc kastaba ha ahaatee sida uu qoraayo sharciga tiradiisu tahay 32 ee 25kii December 1969.

Qodobka 7aad

Sharci allaale sharcigii aan la socon sharcigan ama waafaqsaneyn waa la baab'yey.

Qodobka 8aad

Sharcigani wuxuu hirgeli doona marka Jaalle Guddoonshaha Golaha Sare ee Kacaanka uu saxiixo, waxaana lagu soo saari doona Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 26-12-1973.

Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre
GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA
19 Febrayo 1974, L. 22..
Dallacaad Sarkaalnimo.

GOLAHA SARE EE KACAANKA
MADAWEYNAHA

ASAGOO ARKAY Xaashidii 1aad iyo tii 2aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969;

ASAGOO ARKAY Qodobka 5aad (lambarka 4aad) ee Sharciga ku saabsan dhismaha Ciidanka Boliska lana soo saaray 23kii disambar 1972, kuna lambarsan 2;

ASAGOO ARKAY Warqaddii taariikhdeedu ahayd 6-2-1974 kuna lambarsanayd SEC-A-8-1 ee Taliyaha Ciidanka Boliska ugaga soo xogwarramay 52 Kormeere Saddexaad ee ka mid ah Ciidanka Boliska asagoo soo jeediyay in la dallacsiiyo;

ASAGOO DHEGEYSTAY Taladii Xoghayaha Dawladda ee Arri-